



## **Aan kaa bixino labada sano ee ugu horeeya ee kuliyaada markaad xirfadaada shaqo aad u doorato waxbarashada, ee TREP**



Waa maxay TREP? **Waa Waxbarashada Tababarka Macalinka & Diyaarinta** waa barnaamijka shanaad iyo lixaad oo dugsi sare ah kaas oo u ogolaanaya ardayda inay ku sii wataan shahaado jaamacadeed dhinaca waxbarasho ee kuleejka/jaamacada labada sano isla markiiba ka dib markey dhamaystan fasalka 12aad. Degmada Dugsiga Cherry Creek waxay bixinaysaa kharashka waxbarashada, khidmadaha loo baahan yahay, iyo buugaagta.

### **Ardaygu waa inuu buuxiyaa shuruudo dhowr ah si loogu tixgeliyo barnaamijka TREP.**

1. Ardaygu waa inuu si fiican u dhamaysto, ama uu ku jiro jadwalka si uu u dhamaystiro, ugu yaraan hal koorso isku dhaf oo isku mid ah oo ku saabsan nidaamka Baraha (fiiri boga xiga) inta lagu jiro sanadka ugu dambeeya. La hadal la-taliyahaaga dugsiga sare si aad u aragto fasalada laga bixinayo dugsigaaga sare ee aad iska diiwaan gelin karto waqtiga dayrta -fall ama gu'ga-spring sannadkaaga ugu dambeeya. Waa inaad iska diiwaangelisaa oo aad kasbataa dhibcaha kuliyaada fasalkaas. Ardayda sanadka ugu dambeeya ee Barnaamijka Barayaasha Mustaqbalka ee diyaarka u ah qalinjabinta yaa si otomaatig ah u buuxinaya shuruudaha koorasyada.
2. Ardaygu waa inuu Diyaar u ahaadaa Kuliyaada umana baahna koorasyo horumarineed sida waafaqsan barnaamijka uu doortay. Fiiri shaxda boga xiga ee shuruudaha u diyaasanaanta kuliyaada.
3. Ardaygu wuxuu codsanayaa oo loo aqbalaa barnaamijka dugsiga sare ka dib, machad ka mid ah kuliyaadaha Colorado ee tacliinta sare oo bixisa fasallo isku dhaf ah oo isku mid ah iyadoo lala kaashanayo Dugsiyada Cherry Creek.
4. Ardaygu wuxuu codsanayaa oo laga aqbalaa barnaamijka TREP. Codsigu wuxuu furmayaa qiyaastii Noofambar 1 ee sannad kasta wuxuuna dhamaadaa March 1.

*La soco in Waaxda Waxbarashada ee Colorado ay xadideyso inta arday ee ka qaybqaadan kara barnaamijka TREP degmo kasta. Waxaan ku dhiirigelinaynaa dhamaan ardayda xiiseynaysa inay codsadaan laakiin ma damaanad qaadi karno aqbalaada barnaamijka.*

### **Waa maxay kuliyaadaha dugsiyada dugsiga sare ka dib, ka qayb qaata barnaamijka TREP?**

Laga bilaabo Oktoobar 2023, Kuliyaadaha soo socdaa waxay kaqeybqaataan TREP: Arapahoe Community College, Community College of Aurora, Community College of Denver, Red Rocks Community College, Metropolitan State University/Denver, iyo University of Northern Colorado.



**Waa maxay koorsooyinka ku jira Barnaamijka Baraha?**

Maabka shaxdan waxaa bixiya Waaxda Waxbarashada ee Colorado waxayna isticmaashaa lambarada koorsooyinka iyo magacyada laga yaabo ama ay dhici karto inaysan u dhigmin waxa lagu bixiyo dugsii kasta oo CCSD ah. La shaqee la-taliyahaaga dugsiga sare si aad u aragto mid ka mid ah koorsooyinka isku dhafan ee isku midka ah iyo koorsooyinka (yada) kuu diyaarsan si aad u qaadato sanadka kugu dambeeya sare.

### Educator Pathway Coursework

<p><b>Early Childhood Educators:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• ECE1011: Intro to ECE</li> <li>• ECE2101: Working with Families &amp; Communities</li> <li>• ECE2381: Child Growth &amp; Development</li> </ul> <p><b>All Other Licensure Areas:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• EDU2211: Intro to Education</li> <li>• EDU2341: Multicultural Education</li> <li>• PSY2440: Human Growth &amp; Development <b>OR</b> PSY2441: Child Development</li> </ul> <p><b>All Licensure Areas:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• EDU2088: Practicum II</li> <li>• EDU2611: Teaching, Learning, &amp; Technology</li> </ul>	<p><b>All Licensure Areas:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• ART1110: Art Appreciation <b>OR</b> MUS1020: Music Appreciation <b>OR</b> THE1005: Theater Appreciation <b>OR</b> DAN1025 Dance Appreciation (GT-AH1) <b>OR</b> PHI1012: Ethics</li> <li>• ENG1021: English Composition I (GT-CO1)</li> <li>• ENG1022: English Composition II (GT-CO2)</li> <li>• GEO1005: World Regional Geography <b>OR</b> GEO1006: Human Geography (GT-SS2)</li> <li>• HIS1210: US History to Reconstruction <b>OR</b> HIS1220: US History Since Civil War (GT-HI1)</li> <li>• LIT1015: Intro to Literature (GT-AH2) <b>OR</b> LIT2055: Children's Literature (GT-AH2)</li> <li>• POS2020: Introduction to Political Science <b>OR</b> POS1011: American Government (GT-SS1)</li> <li>• Any 2 GTSC-1 <b>OR</b> Any GTSC-1 + GTSC-2</li> </ul>	<p><b>Mathematics Courses Defined by Licensure Area:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• <b>Early Childhood Education:</b> MAT1240: Mathematics for the Liberal Arts <b>OR</b> MAT1260: Intro to Stats</li> <li>• <b>Elementary Education:</b> MAT1260: Intro to Stats <b>OR</b> MAT1220/1230: Integrated Math 1-2</li> <li>• <b>Secondary Humanities:</b> MAT1260: Intro to Stats</li> <li>• <b>Secondary Math:</b> MAT2410: Calculus I</li> <li>• <b>Secondary Science:</b> MAT1260: Intro to Stats <b>OR</b> MAT1340: College Algebra</li> <li>• <b>K-12 Fine Arts:</b> MAT1260: Intro to Stats</li> <li>• <b>SPED:</b> MAT1240: Mathematics for the Liberal Arts <b>OR</b> MAT1220/1230: Integrated Math 1-2</li> </ul>
--	---	--

**Ka waran ardayda ku jirta Barnaamijka Baraha Mustaqbalka?** Ardayda dhigata fasalka ugu dambeeya ee CCSD Barnaamijka baraha mstaqbalka waxay si toos ah u buuxiyaan shuruudaha koorasyada.

**Sidee ardayga loogu tixgeliyaa inuu diyaar u yahay kulliyad?** Ardaygu waa inuu diyaar uahaadaa kuliyaada xaga xisaabta iyo Ingiriiska kuwaas oo lagu gaaro dhibcaha imtixaanka, koorsooyinka, ama isku darka labadooda.

Ingiriiska	Xisaabta
SAT Ingiriis - 470	Xisaabta SAT - 500
ACT Ingiriis - 18	Xisaabta ACT - 19
Accuplacer Qoraalka Jiilka Xiga - 246	
Accuplacer Jiilka Xiga AAF - 235	



ENG 1021 - CE Ingiriisi kombosishanka (isdiwaan galin isku dhafan keena dhibcaha C ama ka fiican)	MAT 1340 - Kulliyadda CE Algebra (isdiwaan galin isku dhafan keena dhibcaha C ama ka fiican)
---	--

### **Sidee ayuu u shaqeeyaa TREP?**

- Ardaydu waxay heli doonaan waxbarasho, buugaag iyo khidmadaha loo baahan yahay oo laga bixiyo inta lagu jiro laba sano oo dugsiyeed si toos ah kadib fasalka 12<sup>th</sup>.
- Ardayda TREP waxay noqon karaan arday waqti-nus ah (3-11 saacadood simistar kasta) ama arday waqti-buuxa ah (12-16 saacadood oo ah simistar kasta.)
- Ardaygu wuxuu sii ahaanayaa arday ku sugan Degmada Dugsiga Cherry Creek laba sano oo waxbarasho oo dheeri ah ka dib fasalka 12aad. Tan waxaa lagu magacaabaa inay noqoto fasalka 5aad iyo 6aad ee dugsiga sare. Sababtoo ah ardayga weli waxaa loo tixgeliyaa arday dugsi sare, ardaygu ma helayo kaalmada maaliyadeed ee federaalka iyo deeqaha waxbarasho ee loogu talagalay ardayda cusub inta ay ku jiraan TREP.
- Sanduuqa Fursadda Colorado (COF) wuxuu hoos u dhigayaa kharashka waxbarashada ee machadka dugsiga sare kadib CCSD waxay bixisaa kharashaadka waxbarashada ee haray.
- Dhibcaha iyo buundooyinka lagu kasbaday TREP waxaa lagu dari doonaa qoraalka dugsiga sare iyo qoraalka kuleejka.
- Ardaygu wuxuu fasalo ka qaadanaayaa kuliyada/jaamacada. Fasalada badankood waa inay ahaadaan fasallo lagu qaato kuliyada dhexdeeda.
- Ardaydu waxay heli doonaan shahaadada dugsiga sare kadib markay dhamaystiraan sanadaha TREP oo leh taariikhda qalin-jabinta guga sanadka ugu dambeeya ee TREP.
- Ardayda waxaa lagu dhiirigelinayaa inay kaqeybqaataan “qalinjabinta bulshada” hadii ay haystaan shuruudaha qalin jabinta. Tani waxay ka dhigan tahay inay ka qayb qaadanaayaan xafladda qalin-jabinta sanadka qalin-jabinta ee loo qorsheeyay. Waxay magacyadooda ku arki doonaan barnaamijka qalin-jabinta iyo dhamaan howlaha kale ee qalin-jabinta dabaaldega ah. Shahaadadooda rasmiga ah ee dugsiga sare yaa dib loo dhigi doonaa laba sano, ilaa ay ka dhammeeyaan sanadka ugu dambeeya ee TREP.
- Degmadu waxay bixin kartaa warqad sheegaysa in ardaygu buuxiyay shuruudaha qalin-jabinta dugsiga sare hadii ardaygu u baahan yahay dukumiinti xaga shaqada, caymiska, iwm.
- Qoyska ardaygu waa inay dhamaystiraan buuxinta khadka tooska ah ee simistarka dayrta-fallka [my.cherrycreekschools.org](http://my.cherrycreekschools.org) laakiin ardaygu uma baahna inuu aado dugsiga sare.



---

### Sida loo Codsado

- Ardaygu waa inuu marka hore la kulmo la-taliyaha dugsiga sare si uu ugala hadlo TREP, u arko hadii ay u qalmaan oo ay wax ka bartaan barnaamijka.
- Ardaygu wuxuu codsanayaa inta u dhaxaysa Noofambar 1 iyo March 1 ee sanadka 12.
- Ardaygu wuxuu u baahan yahay inuu keeno qoraalka kuleejka ee aan rasmiga ahayn si uu u muujiyo dhibcaha kuleejka ee ay kasbadeen oo qayb ka ah codsigooda
- La taliyaha dugsiga sare yaa bixin doona qoraalka dugsiga sare.
- Ardayga waxaa la ogeysiin doonaa aqbalaaddooda barnaamijka TREP dhamaadka May.
- Ardayga iyo mas'uulka yaa dib u fiirin doona oo saxiixi doona heshiiska TREP hab elektirooniga ah. Heshiiskan waxaa loo diri doonaa cinwaanka emaylka CCSD ee ardayga iyo cinwaanka iimaylka Qoyska 1/Mas'uulka 1. Waxay noqon doontaa "PandaDoc" luqadda uu ardaygu codsaday. Sida "PandaDoc," saxiixayaasha yaa dib u eegi kara, bilow ah, oo saxiixi kara elektaroonig ahaan.
- Ardayga waa la aqbali karaa TREP ka dibna wuxuu go'aansan karaa inuusan ka qaybgalin. Codsigu ma aha heshiis qasab ah.
- Ma jiraan wax ganaaxyo dhaqaale ah hadii ardaygu go'aansado inuu ka baxo barnaamijka TREP.

Xiriirinta si aad u dalbato TREP waa: [www.cherrycreekschools.org/page/14839](http://www.cherrycreekschools.org/page/14839)



### Wixii macluumaad dheeraad ah

La xiriir la-taliyaha dugsiga sare ee ardayga

La xiriir Waaxda Diyaargarowga Shaqaalaha Dugsiga Sare ee CCSD  
Tara Bell, Maamulaha, [tbell18@cherrycreekschools.org](mailto:tbell18@cherrycreekschools.org)  
Margaret Krob, Kaaliyaha, [mkrob@cherrycreekschools.org](mailto:mkrob@cherrycreekschools.org)



*Dedicated to Excellence*  
Cherry Creek Schools

# TREP

## Waxbarashada Tababarka Macalinka & Diyaarinta

---

Dib u fiiri macluumaadka boga internetka ee Degmada  
[www.cherrycreekschools.org/page/14839](http://www.cherrycreekschools.org/page/14839)

Dib u fiiri websaydhka Waaxda Waxbarashada ee Colorado  
<https://www.cde.state.co.us/postsecondary/trepfaq>